JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
BAARLAMAANKA FEDERAALKA SOOMAALIYA

GSH: 302/1/B-10/20:الرقم

Mogadishu, September 26, 2020 التاريخ

**Ku:** **Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya**
**Muqdisho.**

---

**Ujeeddo:** **Ansaxinta Sharciga Heshiiska Siyaasadeed ee Jihaynta Doorashada Baarlamaanka Federaalka ee 2020/2021**

M.ne Madaxweyne;

Tixraac Warqaddaadi **Lr. JFS/XM/001/LA/9/2**0 ee **24.09.2020** kuna saabsan codsi sharciyenta Heshiis Siyaasadeedka ay wadajirka u gaareen xubnaha Golaha Wadatashiga Qaranka. waxaan kugu wargelineyna in Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya Kalfadhiga 7aad Kulankooda Wadajirka ah ee 6aad oo lagu qabtay Xarunta Golaha Shacabka 26.09.2020, oo ay goobjoog yihiin 215 Xubnood ka mid ah Golaha Shacabka iyo 40 xubnood ka mid ah Aqalka Sare oo codeynaya wuxuu, si waafaqsan Qodobka 69aad Faqradda (1) (a) (b) iyo Qodobka 71aad farqadiisa (b) ee Dastuurka Federaalka, Sharciga halkan ku lifaaqan Baarlamaanka JFS wuxuu ku ansixiyey 252 Oggol ah, Diiday 2 iyo ka aamusay 1 xildhibaan.

Haddaba, M.ne Madaxweyne waxaan kaa codsanayaa in Sharciga Heshiiska Siyaasadeed ee Jihaynta Doorashooyinka 2020-2021 halkan ku lifaaqan aad ku meelmariso Xeer Madaxweyne si waafaqsan Qodobka 90aad xarafka (f) ee Dastuurka JFS looguna soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Naga Guddoon Salaan Diiran iyo Qaddarin Gaar ah.

**M.ne Maxammad Mursal Sh. Cabdiraxmaan**
**Guddoomiyaha Golaha Shacabka**

**M.ne Cabdi Xashi Cabdullahi**
**Guddoomiyaha Golaha Aqalka Sare**

# JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA

# SHARCIGA DOORASHADA 2020-2021 EE BAARLAMAANKA 11-aad

## Tusmo

QODOBKA 1-AAD: DIB U DHIGISTA DOORASHADA TOOSKA AH.......... 2
QODOBKA 2-AAD: SHARCIYEYNTA HESHIISKA SIYAASADEED EE DOORASHADA.......... 2
QODOBKA 3-AAD: XILHAYNTA HAY'ADAHA DASTUURIGA AH EE DAWLADDA.......... 3
QODOBKA 4-AAD: DHAQANGALKA SHARCIGA.......... 3

# BAARLAMAANKA FEDERAALKA SOOMAALIYA

**MARKUU ARKAY:** Qodobka 64 (1) ee Dastuurka Federaalka oo xeeriyey in "Xubnaha Golaha Shacabka waxaa si toos ah, qarsoodi ah, oo madaxbannaan kusoo dooranaya shacabka Jamhuuriyadda Federaalka ee Soomaaliya" iyo Qodobka 72 (1) ee Dastuurka Federaalka oo xeeriyey in "Xubnaha Aqalka Sare ee Baarlamaanka Federaalka ay si toos ah, qarsoodi ah oo madaxbannaan usoo dooranayo shacabka Dawladaha xubnaha ka ah Dawladda Federaalka";

**MARKUU DHEGEYSTAY:** Warbixinta Guddiga Madaxabannaan ee Doorashooyinka Qaranka ee ku saabsanayd doorashada tooska ah, qarsoodi ah, oo madaxbannaan ee 2020-2021 uu ka jeediyey Golaha Shacabka Kalfadhigiisa 7-aad Kulankiisa 10-aad ee 27kii Juun 2020;

**MARKUU DHEGEYSTEY:** Hadaljeedinta Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya uu ka horjeediyey Golaha Shacabka Kalfadhiga 7aad Kulankiisa 2aad Gaarka ah ee 15kii Agoosto 2020 kuna ballanqaaday in heshiisyada jiheynta siyaasadda doorashooyinka 2020-2021 lagu gaaro Golaha Wadatashiga Qaranka ansixin loo horkeeni doono Kulanka guud ee Labada Aqal Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya;

**MARKUU ARKAY:** Warqadda Madaxweynaha Jumhuuriyadda Federaalka Soomaaliya Lr. JFS/XM/001/LA/9/20 ee 24.09.2020 kuna saabsan codsi sharciyenta Heshiis Siyaasadeedka ay wadajirka u gaareen xubnaha Golaha Wadatashiga Qaranka;

**MARKUU KA BAARAANDEGAY:** Heshiiska Siyaasadeed iyo talooyinka halkan ku lifaaqan, oo ay wada gaareen Xubnaha Golaha Wadatashiga Qaranka, oo uu hoggaaminaayey Madaxweynaha JFS, kuna saabsan jiheynta Siyaasadda Doorashada ay ku imaanayaan xubnaha Labada Aqal ee Baarlamaanka Federaalka 11-aad ee Soomaaliya;

**MARKUU ARKAY:** In ay lagama maarmaan tahay in dhammaadka muddada xilhaynta Baarlamaanka 10-aad ka hor laysla meeldhigo tabta ugu habboon oo lagu keeni karo xubnaha Labada Aqal ee Baarlamaanka 11-aad ee Soomaaliya;

**MARKUU GARWAAQSADAY:** Duruufaha uu dalku hadda ku suganyahay aysan suurtogalinayn qabashada doorasho toos ah oo ku dhacda waqtigeeda; ayna suurtagaltahay tahay in xubnaha Barlamaanka 11-aad doorashooyinkoodu ku yimaado dib u dhac keeni kara firaaq saameeya sharciyadda jiritaanka Hay'adaha Dastuuriga ee Dawladda Federaalka Soomaaliya;

**MARKUU ARKAY:** Sharciga Wax-ka-beddelidda Dastuurka Federaalka Lr. 20 ee 27.06. 2016;

**MARKUU ARKAY:** Sharciga Doorashooyinka Qaranka ee Heer Federaal Lr. 23 ee 20.02.2020;

**MARKUU ARKAY:** Qodobka 69 (1) (a) iyo (b) ee Dastuurka Federaalka Soomaaliya oo xeeriyey Awoodaha Golaha Shacabka iyo Qodobka 71 (b) ee Dastuurka Federaalka oo xeeriyey awoodaha sharcidajinta Aqalka Sare;

Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya Kalfadhigiisa 7aad Kulankiisa 6-aad wadajirka ah oo lagu qabtay Xarunta Golaha Shacabka 26.09.2020, oo ay goobjoog yihiin 215 Xubnood ka mid ah Golaha Shacabka iyo 40 xubnood ka mid ah Aqalka Sare oo codeynaya wuxuu ansaxiyey Sharcigan:

## Qodobka 1-aad:
## Dib u dhigista Doorashada Tooska ah

1. Ayadoo aan waxba loo dhimaynin Qodobbada 64 (1) iyo 72 (1) ee Dastuurka Federaalka Soomaaliya, ayaa sharcigan dib loogu dhigay qabashada Doorashooyinka tooska ah ee Labada Aqal ee Baarlamaanka 11-aad ee 2020-2021 iyo dhaqangalka Sharciga Doorashooyinka Qaranka ee Heer Federaal Lr. 23 ee 20.02.2020.
2. Xubnaha Labada Aqal ee Baarlamaanka 11-aad ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waxaa lagu soo dooranayaa nidaamka Doorashada Dadban.

## Qodobka 2-aad:
## Sharciyeynta Heshiiska Siyaasadeed ee Doorashada

1. Qodobkan waxaa lagu sharciyeeyey Heshiiska siyaasadeed ee Golaha Wadatashiga Qaranka ku taariikhaysan 17.09.2020, oo lagu jiheeyey qaabka Doorashada 2020-21 ay ku imanayaan xubnaha Baarlamaanka 11-aad ee Soomaaliya.
2. Qodobka 4-aad ee Heshiis-siyaasadeed ee ku xusan farqadda 1-aad ee qodobkan, ayadoo aan nuxurkeeda wax loo dhimeyn waxaa loo xeeriye loona siiqeeyey sidan: "In Xulista Ergada ay iska kaashadaan Odayaasha Dhaqanka iyo Bulshada Rayadka ee Beesha kursiga iska leh, Dawlado-Goboleedyadana ay yeeshaan diiwaangelinta Eragada."
3. Heshiiska siyaasadeed ee halkan ku lifaaqan kuna xusan faqradda 1-aad ee Qodobkan waa qayb ka mid ah nuxurka sharcigan oo aan ka go'i karin.

## Qodobka 3-aad:
## Xilhaynta Hay'adaha Dastuuriga ah ee Dawladda

1. Si aysan u dhicin firaaq ku yimaada sharciyadda jiritaanka hay'adaha Dastuuriga ah ee Dawladda Federaalka; Baarlamaanka 10-aad oo awoodihiisa Dastuuriga ah u dhamaystirantahay ayaa xilkiisa sii haynaya ilaa iyo maalinta la dhaariyo xildhibaannada loo soo doortay Baarlamaanka cusub ee 11-aad ee Soomaaliya si waafaqsan Qodobka 60aad ee Dastuurka Faderaalka iyo wax-ka-beddelka lagu sameeyey Sharciga Lr. 20 ee 27.06.2016.

2. Hay'adaha kale ee Dastuuriga ah ee Dawladda Federaalka ayaa xilalkooda sii haynaya ilaa iyo inta laga dhiso hay'ad walba hay'addii beddeli lahayd.

## Qodobka 4-aad:
## Dhaqangalka Sharciga

Sharcigan wuxuu dhaqangal noqonayaa ka dib markuu Baarlamaanka Federaalku anshixiyo, Madaxweynaha JFS Xeer Madaxweyne ku meelmariyo, laguna soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Federaalka ee Soomaaliya si waafaqsan Qodobka 84aad iyo Qodobka 85aad ee Dastuurka Federaalka Soomaaliya.

**M.ne Maxammad Mursal Sh. Cabdiraxmaan**
**Guddoomiyaha Golaha Shacabka**

**M.ne Cabdi Xaashi Cabdullahi**
**Guddoomiyaha Golaha Aqalka Sare**

**Muqdisho, 26ka Sebteembar 2020**

**Shirka Wadatashiga Doorashooyinka iyo Dhammeystirka Heshiisyadii Samareeb 1-3**

Muqdisho, Sebteembar 17, 2020

---

**WAR-MURTIYEED**

Shir ay yeesheen Madaxda Dowlada Federaalka ah iyo Dowladaha Xubnaha ka ah oo uu shir guddoominayey Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya Mudane Maxamed Cabdullaahi Farmaajo, ayna ka qayb-galeen Ku-simaha Raysul Wasaaraha Mudane Mahdi Maxamed Guuleed, Madaxweynaha Dowlada Puntland Mudane Saciid Cabdullaahi Deni, Madaxweynaha Jubbaland Mudane Axmed Maxamed Islaam, Madaxweynaha Koonfur Galbeed Mudane Cabdicasiis Xasan Maxamed, Madaxweynaha Galmudug Mudane Axmed Cabdi Kaariye, Madaxweynaha Hirshabelle Mudane Maxamed Cabdi Waare iyo Guddoomiyaha Gobolka Banaadir ahna Duqa Muqdisho Mudane Cumar Maxamuud Maxamed. Shirkaas wuxuu ka dhacay magaalada Mugdisho intii u dhaxaysay 13 -17 Sebteember 2020.

Shirkan waxa uu dabasocday Kulamo isdaba joog ahaa oo kasoo bilowday Samareeb 1 oo ay isugu yimaadeen Madaxweynayaasha Dowladaha Xubnaha ka ah Dowlada Federalka ah ee Puntland, Jubbaland, Galmudug, Hirshabelle iyo Koonfur Galbeed, oo uu ka dhashay Samareeb 2 oo ay wadatashi ku yeesheen Madaxda Dowlada Federaalka ah iyo Madaxda Dowladaha Xubnaha ka ah Dowlada Federaalka ah iyo Gobolka Banaadir oo la xiriiray sidii dalka doorasho waqtigeeda ku qabsoonta ay uga dhici lahayd. Waxaa xusid mudan in shirkan Muqdisho uu dhammeytir u yahay heshiiskii Samareeb 3.

Shir-madaxeedkan inta uu socday waxaa la isla gorfeeyay xaaladaha siyaasadeed, amni iyo bulsho ee ku hareeraysan qabsoomidda doorashada

Barlamaanka Federaalka ah iyo tan Madaxweynaha, taas oo ku dhacda waqtigeeda si waafaqsan heshiisyadii Samareeb.

Haddaba iyadoo taas laga ambaqaadayo, waxay Madaxdu ku dul shaqeeyeen heshiiskii kasoo baxay Samareeb 3. Falanqeyn dheer keddib, iyaga oo dhawraya midnimada dalka iyo wadajirkiisa, tixgelinayana xaaladaha amni iyo siyaasadeed ee dalka ka jira, loona qaban lahaa doorasho xilligeeda ku dhacda, waxay isla qaateen qodobada soo socda;

1. In Dowladda Federaalka ay magacawdo Guddi Doorasho oo heer Federaal ah kaas oo kaashanaya Guddi Doorasho oo heer Dowlad Goboleed ah.
2. In deegaan doorashooyinka Dowladaha Xubnaha ka ah Dowladda Federaalka laga asteeyo labo magaalo oo ah caasimadaha Gobollada oo ku dhisan yahay Dowlad Goboleed kasta.
3. In tirada ergada Xildhibaan walba u codeynaysa ay noqoto 101 ergo oo mataleysa beesha wadaagta kursigaas.
4. In xulista ergada ay iska kaashanayaan odayaasha dhaqanka, bulshada rayidka ah iyo Dowlad Goboleedka.
5. In qoondada haweenka ee 30% ah la ilaaliyo.
6. In Baarlamaanka heer Dowlad Goboleed ay soo doortaan Xildhibaannada Aqalka Sare.
7. In Xildhibaannada Aqalka Sare ee Soomaaliland ay soo doorataan ergo matasha oo wada jir ah.
8. in doorashada Xildhibaannada labada Aqal ee Soomaaliland ay ka dhacdo magaalada Muqdisho.
9. Qorshaha doorashooyinka dalka waxa uu bilaabanayaa 1-da Nofeembar 2020.
10. In sugidda amniga doorashooyinka ay ka wada shaqeeyaan hay'daha amniga ee Dowladda Federaalka Soomaaliya iyo Dowladaha Xubnaha ka ah.
11. Heshiiskan siyaasadeed waxaa loo gudbinayaa Baarlamaanka Federaalka si ay u meel mariyaan.
12. Madaxdu waxa ay adkaynayaan in xorriyadda hadalku ay tahay lama taabtaan sida ku cad Dastuurka KMG ah iyo Xeerka Saxaafadda ee dalka, sidaa darteed, waa in warbaahinta fursad loo siiyaa in ay si xor ah u tabiso goobaha ay codbixintu ka dhacayso, lagana fogaado wax walba oo ka hor

13. Shirku waxa uu uga mahadcelinayaa Madaxda iyo bulshada D( Galmudug sida ay u martigeliyeen shirarkii taariikhiga ahaa ee Sa 1-3. Sidoo kale, waxaa ammaan mudan shacabka iyo Maamulka ( Banaadir sidii diirranayd ee ay usoo dhaweeyeen Madaxda Goboleedyada iyo wufuuddii la socotay.
14. Waxaan bogaadinaynaa Madaxweynaha JFS Mudane M Cabdullaahi Farmaajo hoggaaminta kudhisan isku haynta dalk muujiyay muddadii ay wadahadalladu socdeen, isaga oo xoogga s wadajir iyo wada-ogol lagu dhammeeyo arrimaha doorashooyink
15. Ugu dambeyntii, Shirku waxa uu ku bogaadinaayaa Beesha C kaalinta muuqata ee ay ka geysaneyso dib u dhiska iyo horu dowladnimada Soomaaliya.